

# La aqrinta Canugaaga

3-4 Sannooyinka



## **Ku isticmaalida kaliya 10 daqiiqo oo aqrinta wadajirka maalin walba:**

- **Ku caawisaa canugaaga hormarka  
xirfadaha bulshada iyo dareenka**
- **Xoojiyaa balantooda adiga kula  
galayaan**
- **Ku caawisaa inay ku koraan  
kalsooni, barasho farxad ah.**

## Nabadeey hooyooyin, aabayaal iyo daryeelayaasha!

**Waxaan aaminsannahay in la aqrinta canugaaga ay tahay mid ka mid ah qaababka ugu wanaagsan oo loogu caawinayo inay ugu diyaar garoobaan dugsiga.**

**Buug yarahaan wuxuu ku siinayaa qaar ka mid ah tallooyinkeena ugu wanaagsan ee la aqrinta canugaaga - noogu soo biir onleenka sidoo kale, oo ogow wax badan soo jiidashada wadaagista sheekoooyin, buuggaagta iyo laxanyada.**



[www.bookstart.org.uk/have-some-fun](http://www.bookstart.org.uk/have-some-fun)

# Tallooyinka kugu caawineyso inaad ku raaxeysatid buuggaagtaada maalin walba



**Samey dhawaqyada xayawaanka ama saameynada dhawaaqa - kuwaan waxay ku caawiyaan inay soo nooleeyaan sheekada oo labadiinaba way idinka qosolsiineysaa!**



**Wada qabta ama hel walaalaha iyo gabdhaha inay ku soo biiraan oo kulansiiyo sheekooyin iyo wada heesa.**



**Weydii su'aalaha marka aad wada aqrineysaan sida:  
'Maxaad ku arki kartaa bogga?'  
'Sidee ayaad u maleysay in sifada ay dareemeysa?'**





**Canugaaga ha noqdo sheeko sheegaha.  
Way kuu 'aqrin' karaan sawirada oo ka  
hadal waxa ka dhacayo bogga.**





**Hel meel dagan oo ka baxsan qeylo,  
talefeshinka iyo mobeelada.**





**Haddii aad dareentid raaxo, isku day inaad  
jiido wajiyoo qosol ah adiga oo sifeynayo  
codadka - kuwaan marwalba way ka  
qosolsiyyaan carruurta!**



# Fiiri sawirada oo bilow ka hadlida iyaga



- Ma heli kartaa dinosaur ama tuke? Maxaa kale ayaad arki kartaa?
- Imisa moos ayaa ku jiro halkaas?
- Ciyaarahee ayay carruurta ciyaarayaan?



**Inta badan aad wada hadashaan,  
erayada badan ee canugaaga baranayo.**

# Waxyaabaha la sameeyo



**Ciyaar ciyarta qiyaasida marka ay kaa dhammaato oo qiyaastii wadajir ah. Weydii canugaaga lambaradee ama xarfahee waxay arki karaan basaska, boorarka iyo aastaamaha.**



**Canugaaga haku baashaalo isaga oo ku sameynayo aastaamo warqada oo qalin geed ama qalinka sawirkha. Ma jiraan qaab qaldanaan iyo saxnaan ee aad ku sawirtid sawirkha - tani waa heerka ugu horeeyo ee lagu qorayo ama lagu sawirayo.**



**Ku dhiiro geli canugaada in uu weydiyo su'aalo. Su'aalo weydiinta waa mida ugu muhiimsan xirfadaha ee ardayga u baahanyahay!**



# Raadinayo wax badan?

- ★ **Booqo maktabaadada deegaanka halkaas oo aad ka deynsan kartid buuggaagta oo bilaash ah. Fiiri haddii ay maamuleen kulanka Waqtiga heesta ama Waqtiga sheekada halkaas oo aad kula kulmi kartid qoysaska kale oo aad kuwada raaxeystaan kulamada!**
- ★ **Weydii martigaaga caafimaadka afkaaraha ee sida aad u taageeri kartid hormarinta socodbaradkaaga idinka oo wada wadaagayo buuggaagta.**
- ★ **Ka hel buuggaag wanaagsan onleenka oo ay la jiraan Book Trust! Wuxaan haynaa afkaaro badan sida buuggaagta ay ugu raaxeystaan websaydkaaga oo ay ku jiraan ciyaaraha iyo buugaagta sheekada onleenka.**



# Doorashada Buuggaagta

**Book Trust wuxuu qaadaa buuggaagtaa kiciya  
qiyaasaha oo waa madadaalo.**


**Nagu soo biir onleenka si aad uga heshid  
tallooyinka buuggaag cajiib oo buuxo!**

**[www.bookstart.org.uk/books](http://www.bookstart.org.uk/books)**



**Ku baashaal buuggaag raadin badan si aad ugu  
wadaagtid websaydkeena oo aad ku raaxeysatid  
aqrinta buuggaagta ee baakida Bookstart. Way  
wanaagsantahay in la aqriyo isla buugga markale iyo  
markale sababtoo ah buuggaagta aad garaneyso way  
raaxo leeyihiiin oo waxay dhisaan kalsooni.**

Halkaan waa tusaalaha buugaagta  
wanaagsan ee aad ka ogaan kartid Helaha  
Buugga Bookstart!



## Duck in the Truck

“ Duck in the Truck marnaba  
kama dhacdo ka qosolsii  
gabadheyda 3 sanno jirka ah.  
Maxaa sidaas cajiib uga ah  
buugga uu yahay dheelitirka  
laxan farxad leh iyo sawiro.  
Waan jacelnahay kaliya! ”

# Wada aqriya maa;lin walba oo sii canugaaga jaceyl nolol dheer ee buuggaagta iyo aqrinta.



Booqo **booktrust.org.uk** si aad wax badan uga ogaatid soo  
jiidashada wadaagida.

## Aqrin farxad leh!

**Book Trust** waa samafal ka shaqeyo inay ku badesho nololaha dhinaca dhiirogelinta jaceylka aqrinta. Waan ognahay in aqrinta raaxada ah ay ku caawiso carruurta inay wanaag ku sameeyaan dugsiga oo kordhiyaan fayo qabkooda, marka waxaan sameynaa wax walba oo aan awoodno ee aan ku caawino hubinta in canug walba uu ku raaxeysan karo sheekooyinka iyo buuggaagta.

Waxaan rajeyneynaa in aqrinta ay ka qeyb noqoneyso jadwalkaaga joogtada ah ee ah in qoyska oo dhan horay u eego..

Samafalka lambarka 313343

[booktrust.org.uk](http://booktrust.org.uk)

 **BookTrust**  
Inspire a love of reading